**Somalia: Halkan waxaan u joognaa in aan nolol ama naf badbaadino**

Wuxuu ku yaalaa ama dhacaa waqooyiga caasimada, Isbitaalka Keysaney wuxuu ka kooban yahay 90 sariirood iyo qol qaliin oo si wanaagsan u qalabaysan. Laanqayrta Cas ayaa furtay 1992 oo weliba tababartay shaqaalaha isbitaalka; Isbitaalka waxaa lagu wareejiyey Bisha Cas ee Soomaaliyeed 1995tii kaasoo ay Bisha Casi gacanta ku haysay ilaa iyo hadda inkasta oo ay ICRCdu taageeraysay. Agaasimaha isbitaalka, Yusuf Xasan Maxamed, ayaa qeexaya xaalada iyo dhibaatooyinka mararka qaar la soo gudboonaada iyagoo ku guda jira hawlaha dawaynta bukaanada iyo dhaawacyada kale.

**Waa maxay dhibta ama caqabada ugu wayn ee lala kulmo maanta si isbitaal looga shaqeeyo?**

Caqabada ugu wayn ee aan wajahnaa waa mida amniga Muqdisho, khaasatan marka dagaalku ka dhacayo agagaarka isbitaalka. Dagaalku waa dhacdo joogto ah Muqdisho wuxuuna mararka qaar saameeyaa saadka iyo daawooyinka isbitaalka, ama soo gaarista bukaanka ee isbitaalka. Shaqaalaheena laftooda waxaa haysta ama qabsada culaabo ku aadan xaaladaha aan la isku halayn Karin ee dagaalada iyo sida ay wax noqon karaan inta colaadu socoto, iyo in xitaa reerahoodu qatar ku sugan yihiin. Iyadoo ay jiraan caqabadahaas oo dhan, ayaan intii itaalkayaga ah u hawl galnaa sidii aan nolol u badbaadin lahayn. Waxaana wadi doonaa sidii aan ugu shaqayn lahayn dadka Soomaaliyeed hadda iyo mustaqbalkaba, maadaama Keysaney tahay hay’ad kaalin muhiim ah ugu jirta hawlaha caafimaadka degdega ah ee dadka ay dagaaladu wax yeeleeyeen in hadda ka badan 20 sano.

Labaatan sano oo dagaalo hubaysan ahi waxay raad wayn ku yeesheen dadka iyo guud ahaanba dalka, taasoo ay natiijadeedu noqotay burbur iyo mushkilad xaalada bai’aadminimo. Dagaalada u dhexeeya kooxaha siyaasada ee iska soo horjeeda ayaa burburiyey kaabayaasha dhaqaalaha ee muhiimka ahaa ee guud ahaanba dalka oo dhan, taasoo ay ku jiraan goobaha muhiimka ah sida isbitaalada. Waxaas oo dhan oo jira ayey Keysaney dawaysay bukaano gaaraya 216’000 oo qof, oo ay ku jiraan 30’000 oo bukaan ay dhaawacyo ka soo gaareen hub ilaa iyo markii la asaasay isbitaalkan 20 sano ka hor. Waxaan aaminsanahay in ay suuragal ka dhigtay in aan mudadaas shaqayno qaab shaqeedkeena ku salaysan mabda’a ah dhexdhexaadnimo iyo eexasho la’aan.

**Sidee u bilowday guud ahaan Keysanay?**

Isbitaalka Keysanay wuxuu si rasmi u farmay 2dii Febraayo 1992. Dhismaha isbitaalku markii hore wuxuu ahaa xabsi. ICRCda ayaa dib u habayn ku samaysay dhismaha oo isbitaal u rogtay si loogu shaqeeyo looguna daweeyo dadka Muqdisho, dhaawacyada iyo weliba dadka kale, iyadoo aan la eegayn qabiil ama aragti siyaasadeed. Waqtigaas waa 1992dii dagaalku kor ayuu u sii kacay, Isbitaalka waxaa imaanayey bukaano aad u tira badan maalin kasta. Waqtigaas markii xaalada magaaladu xumaato, lambarka bukaanku wuxuu dhaafi jiray qaadka ama awooda sariiraha isbitaalka.

Maanta isbitaalku wuxuu la balaartay, ku daris lagu daray saalo cusub oo qaliin oo farsamadii ugu dambaysay ah (OT). Dareenkii shaqaalaha isbitaalka ee maalintii ugu horeysay ee qolka saalada qaliinka ayaa ahaa lama ilaawaan, Wixii waqtigan qolkan cusub ee qaliinka la dhisay ka horeeyey in waxaan dareemayey aanan isbitaal ka shaqayn balse xabsi. Caawinaada iyo dib u habaynta isbitaalka ee ICRCda ayaa ka dhigaysa meel wanaagsan kuna haboon wax u qabadka bukaanada. Tanina waxay shaqadayada ka dhigaysaa mid yara sahlan iyada oo weliba na dhiiri gelisa maalin walba.

**Muxuu ahaa waqtigii ama xusuustii kuugu muhiimsanayd mudadii aad isbitaalka ka shaqaynaysay?**

Daweynta bukaana ee waddan Soomaaliya oo kale ah marna wax sahlan ma ahayn. Mar baa jirtay uu dagaal Muqdisho ka qarxay oo isbitaalka la keenay dhaawacyo aad u tira badan, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen qoys dhan oo ka kooban sideed qof, markii ay dadkaasi yimaadeen, hooyadii qoyska ayaa isla markiiba naf baxday iyadoo uu nuugayo ilmo ay dhashay oo saddex bilood oo keliya jiray markaas. Midan ayaa ahayd xusuustaydii ugu xumayd ee mudadii aan isbitaalka Keysanay ka shaqaynayey.

Xaaladaasi waxay ahayd mid aniga iyo shaqaalaha isbitaalkuba aan u adkaysan waynay. Waxaa na soo martay xaalado iyo waaya aragnimooyin badan oo adag taasoo aan in badan marqaati ka noqonay dhibaatooyinka iyo dhaawacyada bukaanada kuwaas oo ku sugan xaalado adag, maadaama ay tahay dhacdo joogto ah. Si kastaba ha ahaatee, mararka qaar waxaa ina soo marayey waqtiyo farxad iyo yididiilo leh, markii ilmo nabdooni dhashaan tusaale ahaan. Nolosho waa socotaa wax kastaaba ha jireene.Si kastaba ha ahaatee, Waxaan halkan u joognaa in aan naf ama nolol badbaadino.